

SU'AALAHAA JOOGTADA AH EE KUSAABSAN SOO JEEDINTA BAABUUR DHIGASHADA MAGAALADA COLUMBIA – GOOBTA MAMNUUCA KA AH IN BAABUURKA LA DHIGTO

MAXAY TAHAY GOOBTA MAMNUUCA KA AH IN GAARIGA LA DHIGTO (RPZ)?

Goobaha Mamnuuca ka ah in Baabuurta La dhigto waxaa loo sameeyay si loo fududeeyo ama loo yareeyo meelaha ciriiriga ah ee ay baabuurta dhigtaan deriska meesha degan ayada oo la isku dheelitirayo baahooyinka dadka oo dhan si ay u awoodaan in ay isticmaalaan waddooyinka dadweynaha. Gudaha Magaalada Columbia, RPZ 29 waxaa laga dhisay 2009-kii hareeraha boosteejada tareenada fudud. Meelaha RPZ ee ku yaala Koonfur bari Seattle, SDOT waxay sidoo kale usoo saartaa oggolaansho meelaha ganacsiga ee loogu talagalay shaqaalahooda si ay u isticmaalaan.

SIDEE GOOBTA MAMNUUCA KA AH IN GAARIGA LA DHIGTO U SHAQAYSAA?

- RPZ 29 waxay u oggolaanshaa dadka haysta oggolaanshaha in ay meesha gaarigooda dhigtaan muddo ka baddan 2 saacadood inta u dhaxaysa 7 SUBAXNIMO illaa 6 HABBEENIMO, Asniinta-Jimcaha. Waxaa jira meelo yar oo dhismooyin 4 saacadood ah.
- Dhammaan dadka degan gudaha meesha RPZ, ay ku jiraan kuwa dhismooyinka aan lahayn calaamadaha RPZ, waxay xaq u leeyihiin oggolaanshaha RPZ. Hadda qoys kasta wuxuu heli karaa illaa afar oggolaansho ayada oo ay ku xirantahay tirada baabuurta ku diwaan gashan cinwaanka ee ah gudaha goobta RPZ. Sidoo kale ayagu waxay soo iibsaa karaan hal oggolaansho booqasho ah.
- Dhammaan goobaha ganacsiga ee ku yaala gudaha RPZ waxay sidoo kale xaq u leeyihiin in ay usoo iibiyaan oggolaanshaha shaqaalahooda.
- Oggolaanshaha RPZ kaliya wuxuu siinayaa ka reebitaan wakhti xadidan ah dhismooyinka leh calaamada RPZ 29. Dhismooyinka kale, dadka haysta oggolaanshaha waxay u hoggaansanyihiin xadadka wakhtiga iyo shuruudaha lacag bixinta ayada oo ay ku xirantahay xadidaadaha lasoo dhejiyay.

MAXAA LAGA WADAA ISBEDELKA LASOO JEEDIYAY?

Soo jeedinta waxay gaaraysaa bariga RPZ 29 42da Ave S iyo koonfurta illaa S Dawson St. Ka fiiri khariidada bogga gedisan si aad u oggaatid xadka dhismooyinka jira iyo kuwa lasoo jeediyayba.

SABAB LOO BALAARIYAY AAGA 29 MAXAANA LOOGA DHIGAY DHISMOOYINKAN?

- Tirakoob sahan ah iyo dadka oo lala hadlay, mid kamid ah codsashooyinka ugu baddan ee aynu dadka ka maqalnay waxay ahayd in la balaariyo aaga RPZ ee hadda jira. Si loogu soo koobo dhammaan baabuur dhigashada-maalinta ah dadka haysta oggolaanshaha, midaana waxay ka celinaysaa baabuurta aan oggolaanshaha haysanin in ay baabuurtooda dhigtaan muddo ka baddan 2 saacadood maalmaha todobaadka ah waxayna u badantahay in ay midaasi horseedo in la helo boosas baddan oo baabuurta la dhigto.



- Qaanuunka Degmada Seattle wuxuu dhigayaa heerar ku saabsan sida iyo halka laga balaarinayo aagaga RPZ. SDOT waxay dhammaysay daraasado baddan oo ku saabsan meesha baabuurta la dhigto midaas oo lagu qoray dhismooyinka leh heerar sareeya oo boosas banaan oo gaariga la dhigan karo oona kafaal'ideysan kara balaarinta aaga RPZ.

OGGOLAANSHAHA AMA FASAXA MEESHA LAGU GALO MA YAHAY MID LACAG AH?

- Oggolaanshaha waa \$65 labadii sanno, waxaana la socda oggolaansho \$10 ah oo ay heli karaan dadka deegaanka ee haysta dakhli hooseeya.
- Qaanuun ahaan, lacagaha oggolaanshaha waxaa lagu bixiyaa qiimaha maamulka barnaamijka. Maadaama barnaamijku aan ahayn mid magaalada oo dhan ah aagaga RPZ-na waxaa si guud ahaan loo soo dejiyaa marka la codsado, qiimooyinka RPZ waxaa bixinaya dadka ku nool aaga RPZ oona gata oggolaanshaha ama u fasaxida.

SIDEEEN KU HELI KARRA MACLUUMAAD BADDAN?

- Wixii ku saabsan macluumaad baddan ee khuseeya aagaga RPZ, fadlan gal boggaan internetka ah www.seattle.gov/transportation/parking/parkingrpz.htm
- Wixii ku saabsan macluumaad baddan oo khuseeya shaqadeena aynu ka qabano Magaalada Columbia, fadlan gal boggaan internetka ah www.seattle.gov/transportation/parking/cp_ColumbiaCity.htm



Seattle
Department of
Transportation

SIDEEN FAALO UGA BIXIN KARAA AMA U WEYDIIN KARAA SU'AALO?

- Kaga jawaab nidaamkeena su'aalaha ee tooska internetka ah cinwaankan www.surveymonkey.com/r/SDOTCC marka ay tahay Febraayo 20, 2017
- Nagala soo xiriih cinwaankan Columbiacityparking@seattle.gov ama lambarkan 206-733-9026

KADIBNA MAXAA XIGA?

- SDOT waxay qorshaynaysaa in ay soo saarto qorshe kama dambays ah ee loogu talagalay isbedelada lagu samaynayo meesha baabuurta la dhiganayo ku dhowaadkii Abriil 2017
- Ka hor inta aan la samaynin isbedelada RPZ, dhagaysi dad weyne ayaa la qaban doonaa si loo helo faalo ka bixin ama jawaab-celin dheeri ah oo ku saabsan isbedelada RPZ. Midaana waxay u badantahay in ay dhacdo Maajo ama Juun sannadka 2017.
- Kadib marka la dhammeeyo, macluumaad dheeri ah ayaa loo soo diri doonaa dadka deegaanka iyo meelaha ganacsiga ku yaala dhismooyinka gudaha aaga ama meesha RPZ ee la balaariyay.

